

## Booqashada Caasimadda Qarankeenna



Xafiiska Washington wuxuu kaa caawin karaa helitaanka warqad aad ku martid goobaha taariikhiga ah ee ku yaal caasimadda qarankeenna oo dhan:

- ▶ Faras magaalaha U.S.
- ▶ Maxkamadda Sare
- ▶ Maktabadda Golaha Sharci dejinta
- ▶ Xarunta Kaydka Cilmiga Qaranka
- ▶ Xarunta Kennedy
- ▶ Matxafyada Smithsonian-ka
- ▶ Kaniisadda Qaranka
- ▶ Buurta Vernon
- ▶ Guddiga Daabacaadda & Xardhidda

Fadlan soo wac labo bilood ka hor, haddii ay suuorgal tahay, si aan markaa isku dubbarid dalxiis kuugu sameyno. Sidoo kale, fadlan ku hako xafiiskeenna markaad booqaneysid Washington, DC isla markaana saxiix buugga martida.

## Calammada Maraykanka



Calammada U.S. waa la iibsan karaa si loogu xusuusto dhacooyin gaar ah. Haddii aad codsatid, calan waa laga luli karaa Faras magaalaha U.S. iyadoo lacag dheeraad ah la isaga qaadayo ka hor intaan adiga laguu soo dirin. Si aad u heshid calan, fadlan la xiriir xafiiska Washington ama booqo website-keenna [www.house.gov/mccollum](http://www.house.gov/mccollum).

## Lambarrada Telefoonada Muhiimka ah



### DOWLADDA DHEXE

Xafiiska Hawlgalka FBI ..... (612) 376-3200  
Wararka Deynta Ardayda Dowladda Dhexe (800) 433-3243  
Adeegga Caadiyeysta iyo Socdaalka

Xarunta Adeegga Macaamiisha ..... (800) 375-5283  
Adeegga Canshuur soo Celinta Gudaha ..... (800) 829-1040  
Isku qoridda Daryeelka Caafimaadka ..... (800) 772-1213  
Xarunta Diwaangelinta Shakhxiyed ee Qaranka  
(diwannada adeegga millitariga) ..... (301) 837-2950  
Hay'adda Baasaboorrada (Seattle) ..... (206) 808-5700  
Maamulka Ganacsiga Yar Yar ..... (612) 370-2324  
Maamulka Nabadsugidda Bulshada ..... (800) 772-1213  
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha U.S. ..... (612) 664-5600  
Adeegga Boostada U.S. (MN) ..... (612) 349-6397  
Xildhibaan Mark Dayton ee U.S. ..... (612) 727-5220  
Xildhibaan Norm Coleman ee U.S. ..... (651) 645-0323  
Arrimaha Rug Caddaaga ..... (800) 827-1000

### DOWLADDA GOBOLKA

MN Garyaaanka Guud ..... (651) 296-3353  
MN Guddiga Laysanka Gaari Wadidda ..... (651) 296-6911  
MN Barnaamijka Kaalmada Tamarta ..... (800) 657-3805  
MN Xafiiska Guddoomiyaha Gobolka ..... (651) 296-3391  
MN Sharciga Wararka Dadweynaha ..... (651) 296-2146

### DOWLADDA MADANIGA AH

Wararka Guud

- Degmada Dakota ..... (651) 437-3191
- Degmada Ramsey ..... (651) 266-8500
- Degmada Washington ..... (651) 430-8368

Haweeneyda Kongareeska  
**Betty McCollum**  
*waxay soo gudbineysaa*



# Tusiyaha Adeegyada Codbixiyaha

## Xafiiska Washington

1029 Longworth Building  
Washington, DC 20515  
Telefoon: (202) 225-6631  
Faakis: (202) 225-1968

Saacadaha: 9:00 subaxnimo – 6:00 fiidnimo  
<http://www.house.gov/mccollum>

## Xafiiska Saint Paul

165 Western Avenue N., Suite 17  
Saint Paul, MN 55102  
Telefoon: (651) 224-9191  
Faakis: (651) 224-3056

Saacadaha: 8:30 subaxnimo – 5:30 galabnimo

*Somali Translation*



Xildibaan Marwo McCollum iyo Shaqaalabeedu waxa ay si joog ta ab ula kulmaan dadweynaba dagan degmada afraad si ay ugu jawaabaan su aalba dadka degmada dagan ay qabaan iyo si ay u gacan qabtaan ama u tusaaleyaan babka halwaba dawliga ab loo maro.

Gacaliyeyaa Saaxiibbo,

Dowladda Maraykanku waxay nolosheenna u taabataa habab fara badan. Waxay ardayda u xaqiijsaa deyno loogu talagalay kulliyadaha iyo kuwa guryaha gadanaya markii ugu horreysay. Waxay bixisaa Nabadsugidda Bulshada iyo manfacyada rug caddaaga. Waxay dadweynaha ka caawisaa iney dhab ahaan u arkaan waxa ay ku riyoonaayaan iyo iney bilaabaan ganacsii yar ay.

Mararka qaar, waxaad u arkaysaa mid adag in warar laga helo hay'ado badan oo dowladda dhexe ah. Mid ka mid ah shaqooyinkaygu waa inaan xaqiijiyo in dowladda dhexe ay ahaato mid idinka idiiin shaqeyneyso.

Tusiyahaan waxaa loo qaabeeeyey in lagugu ogeysiyo sida shaqaalahayga iyo anigu aan gacan uga geysan karno. Haddii aad u baahan tahay warar ku saabsan barnaamijka dowladda dhexe ama caawino ku saabsan la shaqeeynta hay'adda dowladda dhexe, fadlan ha ka laba labeyn inaad la xiriirtid St. Paulkeyga ama xafiiska Washington.

Waxaan aad ugu faanayaan inaan kuu adeegayo adiga iyo qoyskaaga, iyo dhammaan qoysaska Degmada Wakiillada 4aad.

Waxa ugu wanaagsan ayaan idii rajeynayaan,

Betty McCollum

## Waxaa Loogu Loogu Talagalay Ruug Caddaaga



Halkaan waxaan u joognaa inaan caawinno ragaa iyo haweenka geesiyyinta ah ee u soo adeegay millitarigeenna. Haddii aad su'aalo ka qabtid manfacyada ruug caddaaga ama aad jeceshahay warar ku saabsan deynaha VA, fadlan la xiriir xafiiska St. Paul. Waxaan ku faaneynaa inaan kuu soo bandhignay kaalmada ku aaddan ruug caddaaga Degmada 4aad.

## Adeegyada Ardayda



Xafiiska St. Paul wuxuu bixiyaa adeegyo kala duwan iyo fursado loogu talagalay ardayda dugsiga sare iyo kulliyadda ee Degmada 4aad. Fadlan nagala soo xiriir kaalmada codsiga aad u qoraneysid mid ka mid ah machadyada ugu magaca weyn ee qaranka, maareynta habka deynya ardayda, ama codsiga loogu talagalay tababar goleedka St. Paul-keenna ama xafiiska Washington.

## Waxaa Loogu Talogalay Siinyeerrada




Degmada 4aad waxay leedahay mujtamac aad u fir fircooni ee siinyeerrada. Waxaan halkaan u joognaa inaan xaqiijinno in baahiyaha siinyeerka wax laga qabtay. Haddii aad qabtid su'aal ama wax khuseeya Nabadsugidda Bulshada, Daryelka caafimaadka, ama wixii kale ee arrimo ah, fadlan ha ka laba labeyn inaad la xiriirto xafiiska St. Paul.

## Socdaalka iyo Baasaboorrada



Degmada 4aad ee Minnesota waxay ku xiran tahay daafaha oo adduunka oo dhan. Haddii aad u baahan tahay kaalmo si aad u heshid baasaboor, ama qabtid wax khuseeya fiisaha iyo muwaadinnimada, ama aad jeelaan lahayd inaad wada hadal ka yeelatid wixii kale ee arrimo socdaal ah, fadlan la xiriir xafiiska St. Paul.

## Kaalmada Ganacsiga Yar Yar



Ganacsiga yar yari waa qayb muhiim ah ee mujtamaceenna, isla markaana guuleysashadiisu waa mid aad muhiim ugu ah baraaraaha qarankeenna. Fadlan la xiriira deynta ganacsiga yar yar iyo tabbarrucaadyada. Waxaan dooneynaa inaan kugu caawinno inaad guuleysatid.

## Halkaan Waxaan u Joognaa Inaan Wax Caawinno

Shaqaalahaygu waxay gacan ka geysan karaan iney ka jawaabaan qaar badan oo ka tirsan su'aalahaaga. Fadlan dareen inaad xor u tahay inaad soo wacdo xafiiskayga haddii aad qabtid su'aalo la xiriira:

- ▶ Sharciga Dowladda Dhexe
- ▶ Deynaha FHA
- ▶ Hay'adaha Dowladda Dhexe (IRS, Adeegga Boostada)
- ▶ Manfacadaha Magdhowga Shaqaalaha
- ▶ Tabbarrucaadda Dowladda Dhexe ee ku wajahan Hay'adaha Aan Dheefta Saaran